Xeerka JB-R-2: Xeerka lagu Fullinayo Qeybta 504 oo Xeerka Dhaqancelinta oo 1973 (“Qeybta 504”) iyo Qeybta 504 Nidaamyada Cabashada

Xeerarka xiga waxaa loo hormariyay fullinta Xeerka Guddiga Dugsiga JB – Fursada Waxbarashada Simman iyo Xaqiraadl'aanta. Xeerkaan waxaa loo naqshadeeyay in ay waafaqsanaadaan ujeedada guud iyo maamulayaasha lagu qeexay Xeerka JB, sidoo kale sida saxnaanta federaalka iyo sharciyada gobalka, iyo xeerka deegaanka.

Denver Public Schools waxay bixinayaan waxbarashada ku haboon bulshada (“FAPE”) sida lagu qeexay Qeybta 504 oo carruurta oo dhan ee qabo curyaannimada ee Degmada sida laga rabo sida waafaqsan Qeybta 504 iyo dhammaan fullinta la midka ah ee xeerarka. Arday walba oo u baahan ama la aaminsan in uu u baahanyahay FAPE sida lagu qeexay Qeybta 504, Degmada waxay raaceysaa nidaamyada lagu tilmaamay xeerkaan iyo bilowga qorshayaasha sida waafaqsan Qeybta 504 (“504 Qorshayaasha”).

Faahfaahinta

1. “Sarkaalka Cadeecida Ardayga” waa Agaasimaha Fullinta Adeegyada Ardayga ama wakiilkiisa ama wakiilkeeda kaas oo soo kormeero u hogaansanaanta Qeybta 504.
2. “Shaqsiga Dhiban” wuxuu noqonayaa ardayga Degmada ama waalidkiisa ama waalidkeeda ama masuulka kaas oo si toos ah ay u saameysay iyo/ama marqaati ka ah eedeyn xadgudub oo xeerarka Guddiga ee la xiriira xaqiijinta iyo bixinta FAPE oo ardayda laga xaqiijiyay curyaannimada sida waafaqsan Qeybta 504.

Sarkaalka Cadeecida Waajibaadyadada Ardayga

Sarkaalka Cadeecida Ardayga ama wakiilkiisa/wakiilkeeda dugsiga-ku saleysan ayaa masuul ka noqonayo ka helida codsiyada xaq ulahaanshaha go'aamada sida waafaqsan Qeybta 504 iyo sameynta baaritaanka iyo xiriirinta dhammaan nidaamyada cabashada iyo qaababka oo wixii eedeyn xadgudub ah oo federaalka iyo qaynuunka dawlada ama xeerka Guddiga oo u baahan bixinta FAPE oo ardayda u qalanta ee curyaannimada leh sida waafaqsan Qeybta 504.

Sarkaalka Cadeecida Ardayga Degmada waa:

Agaasimaha Fullinta
Adeegyada Fullinta
Denver Public Schools
1860 Lincoln St.
Denver, CO 80203

Taleefon: (720) 423-3769

Qorshaha Ardayga 504

ADA iyo Qeybta 504 waxay u qeexaan curyaanka sida: (i) curyaan nimada jirka iyo maskaxda oo si wax ku ool u xadeyso hal ama hawlaha badan ee ugu muhiimsan nolasha; (ii) diiwaanka curyaan noocaas ah; ama (iii) loo arkay sida lahaanshaha curyaan noocaas ah.

Sida waafaqsan sharciga quseeyo, Denver Public Schools waxay siinayaan FAPE ardayda u qalanto curyaannimada sida waafaqsan Qeybta 504. Ardayda iyo/ama waaladiinta oo kuwa aaminsan in ardayda ay rabaan adeegyo waafaqsan Qorshaha 504 waxaa lagu dhiirogelinayaa in ay la xiriiraan Sarkaalka Cadeecida Ardayga iyo/ama wakiilkiisa ama wakiilkeeda dugsiga-ku saleysan si loo codsado kulan looga wada hadlo xaq ulahaanshaha imaan kara oo Qorshaha 504. Sidoo kale, dhammaan shaqaalaha Degmada oo kuwa aaminsan in ardayda ay rabaan adeegyo waafaqsan Qorshaha 504 wuu la xiriiri karaa Sarkaalka Cadeecida Ardayda iyo/ama wakiilkiisa ama wakiilkeeda dugsiga-ku saleysan si loo codsado kulan looga wada hadlo xaq ulahaanshaha imaan kara oo Qorshaha 504.

Sarkaalka Cadeecida Ardayga wuxuu abaabulayaa koox (“Kooxda 504”) oo dadka yaqaan ardayga ah, taariiqda ardayga ee dugsiga, baahida gaarka ah ee ardayga, micnaha xog kasta oo qiimeyn ah, iyo go'aamada oo adeegyada ah. Sarkaalka Cadeecida Ardayga wuxuu sidoo kale sameynayaa dadaal macquul ah oo lagu hubinayo ka qeybqaadashada waalidka ardayga ama masuulka oo Kooxda ardayga 504 ah.

Kooxda ardayda 504 waxay tixgelinayaan gudbinta oo xaq u lahaanshaha Qorshaha 504 iyo dhameystirka hadii wax qiimeyn ah ay muhiim tahay si looga go'aan gaaro xaq u lahaanshaha ardayga Qorshaha 504. Degmada waxaa laga yaabaa in ay codsato qiimeyn si looga go'aan gaaro xaq ulahaanshaha Qorshaha 504. Si kastaba, hadii Degmada ay rabooto qiimeyn si looga go'aan gaaro xaq u lahaanshaha Qorshaha 504, Degmada waxay bixineysaa qiimeynta oo jeebkooda ah.

Ardayda loo aqoonsaday curyaannimo sida waafaqsan Qeybta 504, Kooxda ardayga 504 ayaa masuul ka noqonaya go'aaminta adeegyada loo baahanyahay. Markii lagaarayo go'aamo noocaas ah, Kooxda ardayda 504 waxay tixgelinayaan dhammaan warbixinada la xiriira oo la heli karo, iyo waalidka ardayga ama wakiilka waxaa lagu casuumayaa in ay ka qeybqaataan kulamada Kooxda 504 meeshaas oo adeegyo ardayda ah lagu go'aansanayo. Go'aaminta xaq ula haanshaha ardayga iyo qorsheynta

bixinta adeegyo waxbarasho ku haboon, Kooxda ardayda 504 waxay buuxinayaan foomka JB-E: “Qeybta Qorshaha 504.”

Kooxda 504 ayaa sidoo kale go'aansan karta midaas, inkastoo ardayga uu yahay arday curyaan ah sida waafaqsan Qeybta 504, ma jiro adeegyo ku haboon. Dhacdadaas, Kooxda 504 waxay qorayaan in ardayda ay yihiin arday curyaan ah sida waafaqsan Qeybta 504, laakin in ardayga uusan u baahneen adeegyo si markaas loo galo deegaanka waxbarashada.

Dib u eegida Hormarka Ardayga

Kooxda Ardayda 504 waa in ay kormeertaa hormarka ardayga iyo waxtarka Qorshaha ardayga 504 oo sannadlaha meeshaas oo ay suurtagal tahay in laga go'aansado hadii adeegyada la qoray ay ku haboonyihiin iyo muhiimyihiin, iyo si loo hubiyo in baahida ardayga la buuxiyay sida ku fillan baahida faciisa aan curyaanka aheyn. Waalidka ardayga ama masuulka ayaa si qoraal ah lagu soo ogeysiinayaa go'aan walba oo Degmada ee la xiriira aqoonsiga, qiimeynta, ama bedelada ardayga curyaanka ah sida waafaqsan Qeybta 504.

Nidaamyada Cabashada

Eedeymaha waafaqsan Qeybta 504 iyo sida hadii kale laga rabo sharciga, Shaqsiyaadka Murugeysan oo caqabad ku ah aqoonsiga, qiimeynta, bedelka waxbarashada ama adeeg siinta ardayda u baahan ama la aaminsan yahay in ay u baahanyihiin adeegyo waxbarasho ku haboon sida waafaqsan Xeerka 504 wuxuu usoo gudbin karaa cabasho Sarkaalka Cadeecida Ardayga Degmada. Cabashada waxaa lagu sameyn karaa hadal ahaan ama qoraal ahaan, laakin Shaqsiyaadka Dhiban waxaa lagu dhiiro gelinayaa in ay isticmaalaan foomka AC-E-2: “Foomka Cabashada Xaqiraada/Dibaateynta.” Dhammaan wargelin ayay helaan macalimiinta, la taliyayaasha, masuulada, ama shaqaalaha kale ee degmada waxay si degdega ugu soo gudbinayaan Sarkaalka Cadeecida Ardayga.

Dhammaan cabashooyinka waa in ay ku jiraan sharaxaada aasaaska cabashada iyo magacyada dhinacyada ka qeybgalay, oo ay ku jiraan marqaati walbo. Cabashada waa in lagu sameeya 30 maalmood gudahood oo helitaanka go'aanka Kooxda 504 kaas oo ardayga iyo/ama waalidkiisa/waalidkeeda ama masuulka ku diido.

Sarkaalka Cadeecida Ardayga ayaa u magacabaayo wakiil baaro arinta iyo la xiriira Shaqsiga Dhiban oo ku saabsan xaquuqdiisa/xaquuqdeeda rasmiga ah ama aan rasmiga aheyn iyo talaabooyinka waafaqsan xeerka.

Fadlan ogow in cabashooyinka xaqiraada ku saleysan curyaannimada, nidaamyada lagu sheegay **JB-R1** waa in ay quseysaa. Nidaamkaas maka mamnuuci doono xaq u lahaanshaha Shaqsiga Dhiban si uu u raadiyo boksiinaan iyadoo la isticmaalayo nidaamka cabashada ee lagu tilmaamay halkaan ee la xiriira aqoonsiga, dabagalka ama bedelka waxbarashada ardayda.

Nidaamyada Dhexdhaxaadinta aan Rasmiga aheyn

Hadii Sarkaalka Cadeecida Ardayga codsi ka helo dhexdhexaadin aan rasmi aheyn, Sarkaalka Cadeecida Ardayga wuxuu magacaabayaa xubin shaqaalaha Degmada oo loo tababaray dhinaca Qeybta 504 si uu u fududeeyo wadahadal dhexdhexaadin ah. Wixii heshiis ah oo la gaaro iyada oo la isticmaalayo dhexdhexaadin aan rasmi aheyn waxaa lagu siinayaa dhinacyada qoraal ahaan. Nidaamkaan ma saameynayo xaquuqda Shaqsiyaadka Careysan si markaas loo bilaabo Qeybta Degmada kale 504 nidaamyada xalka iyo/ama ka bilow cabashada rasmiga ah Xafiiska Xaquuqda Rayidka.

Nidaamyada Dhageysiga Rasmiga ah

Nidaamka dhageysiga dhexdhexaadinta wuxuu diyaar u ahaanayaa in uu dib u xaliyo qilaafyada la xiriiro aqoonsiga, dabagalka, bedelada, iyo/ama bixinta adeegyada oo xaq u lahaanshaha ardayga oo illaalada Qeybta 504 ee Xeerka Dhaqancelinta oo 1973. Midkood Degmada ama Shaqsiga Dhiban wuxuu bilaabi karaa dhageysi. Shaqsiga Dhibann wuxuu codsanayaa dhageysi isagoo isticmaalayo nidaamka cabashada ee kor lagu aqoonsaday.

Kormeeraha guud ama wakiilka waxay magacaabayaan sarkaalka dhageysiga dhexdhexaadinta. Waalidka ardayga ama masuulka waa in lagu soo ogeysiiyaa qoraal ahaan dhageysiga ugu yaraan 5 maalmo oo dugsi ka hor taariiqda la balamiyay dhageysiga. Ogeysiinta waa in ay ku jirtaa luuqada hooyo ee waalidka iyo waa in ay wehlisaa:

1. Qoraalka waqtiga goobta dhageysiga;
2. Qoraalka xaquuqda waalidka ama xaquuqda masuulka oo la taliye ku matalo; iyo
3. Qoraalka waalidka ama xaquuqda masuulka oo lagu imtixaamayo diiwanada la xiriiro.

Dhageysiga waa in uu rasmi ahaadaa iyo ardayga iyo waalidkiisa ama waalidkeeda ama masuulka wuxuu ka qeybgali karaa dhageysiga iyo wuxuu xaq u lahaanayaa in uu cadeyn keeno iyo marqaatiyo kale. Sharciyada rasmiga ah ee cadeynta ma quseyneyso. Sarkaalka Cadeecida Ardayga ama Wakiilka wuu matali karaa Degmada

oo dhageysiga ah iyo waa in sidoo kale xaq ugu lahaadaa in uu soo bandhigo marqaatida iyo cadeynta kale. Dhageysiga waxay ku dhawaaneysaa bulshada.

Sarkaalka dhageysiga wuxuu keenayaa go'aan qoran oo ku saleysan cadeynta hore loo keenay dhageysiga oo Shaqsiga Dhiban iyo Sarkaalka Cadeecida Ardayga oo 10 dhageysi oo maalmaha dugsiga gudahood ah oo lagu dhameystirayo dhageysiga. Go'aanka sarkaalka dhageysiga waa in ay ku jirtaa cadeyn kooban iyo sababaha go'aanka.

Midkood Shaqsiga Dhiban ama Degmada laga yaabo in ay racfaan ka qaataan go'aanka sarkaalka dhageysiga iyagoo u gudbinayo codsi dib u eegis ah Kormeeraha Guud ama wakiilka 10 maalmo gudahood oo kalendarka ku xiga helida go'aanka sarkaalka dhageysiga. Codsiga waa in uu qoraal noqdaa iyo u sheegaa si gaar ah u cayimaa diidmada codsadaha oo go'aanka sarkaalka dhageysiga ah. Kormeeraha Guud ama wakiilka wuxuu dib u eegayaa diiwaanka dhageysiga iyo laga yaabo in uu codsado warbixin dheeraad ah oo qoran ama marqaati hadal ah. Kormeeraha Guud ama wakiilka waxay sameynayaan go'aan qoraal ah 15 maalmood gudahood oo dugsi ah oo helida racfaanka ah. Go'aanka kormeeraha guud ama wakiilka wuxuu noqonayaa kii ugu dambeeyay.

Ma jiro wax halkaan ku jira oo loo fasiri doono in la siiyo xaquuqda qof kasta madaxbanaanida dhageysiga oo xeerka Guddiga, nidaamka maamulka, qaynuunka, sharciga, xeerka, ama heshiiska oo si cad u cadeynayo xaquuq noocaas ah.

Wakiilada ka Baxsan

Cabashooyinka la xiriira xadgudubyada Qeybta 504/ADA iyo codsiga dhexdhexaadinta xiliga dhageysiga socdo waxaa si toos ah loogu gudbin karaa Xafiiska Xaquuqda Bulshada, Waaxda Waxbarashada Mareykanka, 1244 North Speer Blvd., Suite 310, Denver, CO 80204.

Tixraaca Sharciga.:
Qeybta 504 oo Xeerka Dhaqancelinta oo 1973, 29 U.S.C. § 794
Xeerka Curyaanka Ameerikaanka, 42 U.S.C. § 12101 et seq.
28 C.F.R. § 35.101 et seq.

Aastaanta Tixraaca.:
JB – Fursadaha Waxbarashada Simman iyo xaqiraadl'aanta